CODBIXINTA IYADOO AAD LEEDAHAY

VOTE 2026

Diiwaankaaga danbi MA saameynayo xuquuqdaada inaad ka codeysid Minnesota ilaa aad hadda u xidhan tahay xukun danbi culus.

CODEYNTA KADIB XUKUN DANBI

Laga bilaabo Juun 1, 2023, waxaad codeyn kartaa ilaa iyo inta aanad hadda u xidhnayn xulun danbi, tahay muwaadin Mareykan ah, ugu yaraan jirtid 18 sano Maalinta Doorashada, oo aad degan tahay Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.

CODEYNTA KADIB MARKA XUQUUQAHAAGA LASOO CELIYO

Haddii laguu xidhay xukun danbi, waxaad codeyn kartaa marka xadhigu dhammaado. Marka xuquuqdaada inaad codeysid lasoo celiyo, waa inaad isku diiwaangalisa inaad codeysid. Waxaad iska diiwaangalin kartaa:

TAARIIKHAHA 2026

COD-BIXINTA HORE
Juun 26 - Ogoosto 10

ISKU DIIWAANGALI HORE
Marka la gaadho Julaay 21

DOORASHADA KOOBAAD
Talaadada, Ogoosto 11

COD-BIXINTA HORE
Sabteembar 18 - Noofeembar 2

ISKU DIIWAANGALI HORE
Marka la gaadho Oktoobar 13

MAALINTA DOORASHADA
Talaadada, Noofeembar 3

- Onlaayn ***mnvotes.gov/register***
- Foom warqad ah, lagunasoo celiyo boostada Xafiiska Xog-hayaha Gobolka Minnesota ama xafiiska doorashada ismaamulkaaga
- Si shakhsi ah xafiiska doorashada ismaamulkaaga

kasii wad dhabarka...

Xafiiska Xog-hayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • WAC: 1-877-600-VOTE • QORAAL: 651-217-3862

CODBIXINTA IYADOO AAD LEEDAHAY

VOTE 2026

MA CODEYN KARAA HADDII...

Waxa la igu eedeeyey ama la iiga helay danbi fudud ama danbi yara culus?	**HAA**
Waxaan kujiraa jeel, laakiin hadda uma xidhni xukun danbi culus?	**HAA**
Waxa la igu eedeeyey danbi culus, laakiin la ima xukumin?	**HAA**
Waxa la i siiyey xukun go'aanka maxkamadda ah?	**HAA**
Waxa la igaga helay danbi culus gobol kale laakiin hadda ma xidhni?	**HAA**
Waxaan kujiraa tijaabo ama damiin kadib xukunka danbi culus?	**HAA**
Waxa la igu helay danbi culus waxaanan hadda ku joogaa fasax shaqo?	**HAA**
Waxaan deganahay xarun tijaabo xukun baddelka fadaraalka ee xadhiga xabsi, fasax gobolku kormeeray, ama ujeedo kale oo aan xadhig ahayn? **Waa inaad la tashataa sarkaalkaaga tijaabada haddii aad ka qabtid su'aalo in laguu tixgaliyo "bilaa-xadhig" inta aad joogtid xarunta tijaabada xukun.**	**HAA**
Waxaan hadda kujiraa xabsi anoo waajahaya xukun xabsi, jeel, ama (xukunada danbiyada culus ee fadaraalka) xarun tijaabo xukun?	**MAYA**